Degmadda Hennepin (Hennepin County)
Deeqaha Gargaarida Dib u furida Ganacsiyada yaryar

Su'aalaha inta Badan la Iswaydiiyo (FAQ)

Luulyo 27, 2020

1. **Waxa aan ka codsatay gargaaradda dhaqaale ee ganacsiyada yaryar ee la xiriira cudurka COVID-ka magaalo ka tirsan Degmadda Hennepin, laakiin wali ma ogi inaan helo doono dhaqaalahaa. Ma inaan codsadaa Gargaarada ganacsiyada yaryar ee Degmadda Hennepin iyo deeqda Dib u Furitaanka?**
   Haa. Codsayaasha waxaa dhici karta inay ka helaan gargaar dhaqaale il kale oo Magaaladu leedahay, in kastoo oo aad u baahan tahay inaad diiwaangeliso inaad dhaqaalahaa loo isticmaalayn iska kharash.

2. **Waxaan ka helay gargaar dhaqaale dowlada dhexe iyadoo la adeegsayo ilo kale oo dowlada dhexe leedahay sida barnaamijka [federal emergency Paycheck Protection Program (PPP)] ama Amaahda Halaaga Waxyeelada Dhaqaaale [Economic Injury Disaster Loan (EIDL)], ama qadimaada, xaq ma u leeyahay inaan codsado aadna helo gargaarka dhaqaale ee Ganacsiyada yaryar ama deeqda Dib u furida?**
   Haa, laakiin, Dhaqaalaha Ganacsiyada yaryar iyo deeqaha Dib u Furida waa in loo isticmaalo in lagu bixiyo kharashaadka kale ee ka baxsan isticmaalka cayiman ee dhaqaalaha dowlada dhexe ka yimaada.

3. **Waxa aan ka helay deeq barnaamijka Gargaarka Ganacsiyada yaryar ee Degmada Hennepin (Hennepin County Small Business Relief Fund). Xaq ma u leeyahay inaan codsado aana helo gargaarka dhaqaale ee Ganacsiyada yaryar ama deeqda Dib u furida?**
   Haa. Hase yeeshee, mudnaanta koowaad waxaa la siin ganacsiyada ka helay $5,000 ama ka yar ilo deegaanka hoose, degmada ama gobolka ah. Ganacsi kama heli karo xoolo ka badan $15,000 oo dhaqaale wadar ah Barnaamijka Gargaarka COVID ee Ganacsiyada yaryar ee Degmada Hennepin iyo barnaamijyada soo kabashada ilaa hadda. Tusaale ahaan, hadii ganacsi ka helo $10,000 Gargaarka Ganacsiyada yaryar ee Degmada Hennepin, Ganacsigaasi waxa uu xaq u yeelan $5,000 oo kale oo deeq ah oo uu ka helo Gargaarka Ganacsiyada yaryar ee Degmadda Hennepin iyo maal-gelinta soo Kabashada, laakiin waa in ganacsigu uu galay kharashyo kale oo xaq u leh in la bixiyo.
   Gargaarada Dhaqaale ee Ganacsiyada yaryar la siiyo iyo Maalgelinada soo Kabashada looma isticmaali karo in lagu bixiyo kharashaad ay bixiyeen barnaamijyo magaalo kale, degmo ama gobolku leeyahay.

4. **Waxaan ahay qof iskii u shaqeysta oo aan shaqaale kale lahayn. Xaq ma u leeyahay dhaqaalahan helidiisa?**
   Maya. Deeqda waxaa kaliya oo heli kara ganacsiyada leh shaqaalo ah 1-50 oo uusan ku jirin mulkiilahu.

5. **Waxaa ii shaqeeya shaqaale ka badan 50, laakiin wadarta waqtiga ay shaqeeyaani waxay u dhigantaa inta ay shaqeeyaan 50 qof oo shaqaale ahi. Xaq ma u leeyahay dhaqaalahan helidiisa?**
   Maya. Ganacsiyada xaqqa u leh waa inay u shaqeeyaan ugu badnaan 50 qof wax kasta ha noqoto saacadaha guud ee ay shaqeeyaan.

6. **Ganacsigaygu waxaa rug u ah gurigayga ama meel wareegta sida gawaarida cuntada gada. Xaq ma u leeyahay inaan codsado aana helo dhaqaalahan?**
   Maya, Ganacsiyada guryaha ka furan, kuwa aan lahayn ciwaan rasmi ah oo joogta ah, ama aan ka furnayn meel ka baxsan guriga xaq uma laha inay helaan Dhaqaalaha Ganacsiyada yaryar la siiyo ee Degmada Hennepin iyo deeqaha Dib u Furida. Waa khasab inay jirto goob ganacsi loogu talagalay oo la kiraystay ama la leeyahay halkaa oo hawlgalada aasaasiga ee ganacsigu ay ka dhacaan.

7. **Waa maxay qeexida ganacsiga guriga ka furan?**
   Sida uu dhigayo Qoraalka 587 ka ee hay'ada IRS (IRS Publication 587) ganacsiga guriga ka hwalgalaa waa kan mulkiilahu uu u isticmaalo gurigiisa (goob ka mid ah guriga gudihiisa) meesha ugu weyn ee ganacsigu ka jiro. Taasi waa:
   1. Waxaa si joogto iyo gaar ahaanba ah loogu isticnaalaa maamulka ama maareynta ganacsi baayac-mushtar iyo
   2. In mulkiilahu uusan lahayn goob kale oo rasmi ah oo uu ganacsigu ku sameeyo qayb weyn oo maamulkiisa ama maarayntiisa ah.

8. **Ganacsigaygu waa ganacsi guriga ka hawlgala oo ah bixiye xanaanada ilmaha ah oo shati leh. Xaq ma u leeyahay barnaamijkan?**
   Maya. Ganacsiyada guri ka hawlgalaa xaq uma laha barnaamijkan. Akhbaar ku saabsan ilo kale oo dhaqaale bixiya waxaa dhici karta in laga heli karo halkan: https://mn.gov/mmb/childcare/providers/ .
9. **Waxaan ahayn qof iskii u shaqeeysta iyo/ama qandaraasle xor ah. Xaq ma leeyahay barnaamijkan?**

Maya. Si ay xaq ugu yeeshaan, ganacsiyadu waa khasab inay u shaqeeyo ugu yaraan hal qof oo an ahayn qofka iska leh.

10. Waa maxay qeexida "goob rasmi ah oo jirta"?

    Kaliya ganacsiyada ku leh ciwaan rasmi ah Degmadda Hennepin ayaa xaq u leh deeqda barnaamijkan. Barnaamijkan waxa uu ka wadaa goob rasmi ah oo jirta goobaha rasmiga ah ee ma guuraanka ah sida xafiisyada, bakhaarada, dukaamada iyo rugaha kale ee uu ganacsigu ku sameeyo qayb weyn oo ka mid maamulka ama maareynta ganacsigiisa. Ganacsiyada hawlgaladoodu aysan rug rasmi ah lahayn sida gawaarida cuntada gada, cuntada dibada lagu gado, iwm, looma tixgeliyo inay leeyihiin goobta rasmi ah oo jira oo ay ka abaabulaan hawlgaladooda.

    Rugaha guriga mulkiilaha ganacsiga ku dhex yaal, ee uu ganacsigu ka hawlgalo waxaa loo tixgeliyaa inay yihiin ganacsi guri ka furan. Ganacsiyada guriga ka furani xaq uma laha deeqaha barnaamijkan. Barnaamijkani waxa uu u qeexaa hawlgalada ganacsiyada beeraha sida uu u qeexay Qodobka Hay'ada (Revenue Code 183) loomana tixgeliyo inay yihiin ganacsi guri ka furan.

11. Ganacsigaygu waa wax soo saar beer falasho. Xaq ma u leeyahay barnaamijkan?

    Haa. Hadii laguu xusho inaad hesho deeqda, waxaa dhici karta in lagu waydiisto akhbaar xaqiijinaysa in beer-falashaaadu ay tahay beer wax soo saar ganacsi ee aysan ahayn kuwa ah iska "faakahaysiga".

12. Dukumiintiyo caynkee ah ayaa loo baahan yahay waqtiga codsiga?

    Codsi khadka (online) ah oo la buuxiyey dhamaana su'aalaha oo dhan laga jawaabay weeye waxa kaliya ee marka hore la iska rabo; wax kale oo dukumiintiyo ah oo dheeraad looma baahna inay la socdaan codsiga khadka (online) ka. Hadii codsigaaga lagu xusho habka bakhtiyaa-nasiibka ah (sida, habka tiro-tuurka) lana xaqiijiyo, dukumiitiyo dheeraad ah ayaa la codsan doonaa kolkaa.

13. Dukumiintiyo caynkee ah ayaa loo baahan yahay codsiga ka dib, laakiin ka hor qaybinta deeqda?

    Ganacsiyada waxaa la waydiisan doonaa inay keenaan dukumiintiyada kharashaadka la galay ee xaqqa u leh in la bixiyo oo ay ku jiraan cadeyn bixin, hadii ay quseeyso. Akhbaar ama dukumiintiyo dheeraad ah waxaa dhici karta in loo baahdo si loo go'aamiyo xaq u yeeladka, loo qaybiyo deeqda iyo/ama looga soo baxo shuruudaha soo sheegida, sida dukumiintiyada shaqaalaha, W9, canshuurtii ugu dambeeysay ee la xareeyey, miisaaniyada isticmaalka deeqda iyo ilaha iyo isticmaalka wixii gargaar dhaqaale ah ee la xiriira COVID-19 ka ee la helay, foomka IRS ka ee 941, W3 ama dukumiintiyada kale ee la xiriira mushaarka shaqaalaha.

14. Buundada kiridhidkaygu ma saameynaysaa codsigayga?

    Buundada kiridhidkaagu ma saameyn doonto xad u yeeladkaaga ama u xulashada dhaqaalaha.

15. Siddee loo go'aamiyaa cadadka lacagta ah ee la bixinayo?

    Maamulaha dhaqaalahu waxa uu kaala shaqeyn doonaa inaad xaqiijiso in ganacsigaagga uu saameeyey cudurka COVID waxa uuna xaqiijin doonaa in cadadka kharashaadka xaqqa u yeesha ay yihiin ugu yaraan $2,500 aysana bixin ilo kale oo ay leeyihiin magaaladdu, gobolka ama dowlada dhexe, dhaqaale ugu badnaan $15,000 (cadadka ugu yar ee deeqdu waa $2,500) ee kharashaadka hawlgalada iyo kuwa la xiriira si amaan ah dib ugu furida ganacsigaaga ayaa la heli karaa. Deeqda ugu dambaysa waxa ay ku salaysnaan doontaa kharashka ganacsigaaga ee xaqqa u leh in la bixiyo waxa ayna tix gelin doontaa cadadka dhaqaale ee (CARES Act) ee laga helay ilo magaalo, degmo iyo gobol. Ganacsina kama heli karo wadar deeq oo ka badan $15,000 Degmada Hennepin marka la isku wada daro deeqadaha ganacsiyada yaryar ilaa hada.

16. Kuwee loo tixgeliyaa inay yihiin kharashaad xaq u leh in la bixiyo?

    Deeqaha waxaa loo isticmaali karaa kharashaadka hawlgalada sida kirada rugta ganacsiga, bixinta moorgeejka goobta ganacsiga, korontada, iyo kharashaadka kale ee la galay mudadii u dhaxaaysay Maarso 15, 2020 ilaa iyo Agoosto 30, 2020, oo ah mudadda hadda ee ganacsiyadda ay la soo darseen carqalado ku yimi cudurka COVID-19 awgii. Deeqaha waxaa kaloo loo isticmaali karaa kharashaadka ku taxa-luqa si amaan ah u dib ugu furida iyo/ama wax ka bedelida hawlgalada ganacsiga si looga soo baxo kala fogeynta dadka, loo dhaqangeliyo habraacyo nadaafada/tirtirida/ilaalinta ah oo quman loona meel-mariyo isbedelo kale oo ah hawlgalada iyo is-fahamka ee shaqaalaha iyo macaamiisha. Kharashaadka dhismayaasha ee qandaraasleyaasha waxaa lagu koobi xool aan ka badnayn $2,000.

17. Sidee ayaa go'aamada bixinta deeqda dhaqaale loo gaari doonaa?

    Codsiyada waxaa dib u eegi Degmadda Hennepin iyo maamulaheeda barnaamijka, NextStage, si loo fuliyo shuruudaha xaq u yeeladka. Codsadayaasha aan ka helin dhaqaale ka badan $5000 Degmadda Hennepin, magaalo, ama gobolka ama ilo dhaqaale oo la xiriira COVID-19 ka ayaa mudnaan gaar ah la siin doonaa si ay u helaan dhaqaalaha. Hadii codsiyadu ka bataan dhaqaalaha la heli karo, codsadayaasha waxaa lagu kala xulan doonaa hab bakhtiyaa- nasiib ah ka dib kolka habka mudnaan-siinta ah la dhaqangeliyo.

18. Waxaan u baahnahay caawimaad ah buuxinta codsigan ama waxaan qabaa su'aal guud oo ku saabsan habraaca codsiga. Ciddee la xiriiraa?

Fadlan la xiriir economic.development@hennepin.us Liiska hagayaasha iyo gargaarayaasha ganacsiyada ayaa ku jira shabakadayada (web) halkan here .

19. Ma la iga rabi doonaa inaan dib u bixiyo deeqda hadii aan ka helo dhaqaalaha cudurka COVID-19 awgii loo bixinayo ilo kale sida gobol kale, deegaan hooseedyo kale ama dowladda dhexe ama aan u helo sabab kale?

Hadii aan dhaqaalaha loo isticmaalayn isla kharash kolka dhaqaalaha kale la qoondaynayo, waxaa dhici karta inaad dhaqaale ka hesho ilo kale oo dowlada dhexe ah. Waxa aad mas'uul ka tahay ka soo bixida dhamaan qodobada heshiiska deeqda, waxaana dhici karta inuu xisaabi xil ma leh kugu sameeyaan maamulayaasha dhaqaalaha. Hadii la ogaado inaadan fulayanayn shuruudaha barnaamijka waxaa lagaa rabi inaad soo celiso deeqda dhaqaale ee lagu siiyey.

20. Macluumaadka aan soo gudbiyaa ma yihiin kuwa qarsoodi ah?

Sida uu dhigayo sharciga Minnesota dhamaan macluumaadka oo dhan cidii rabta ayaa arki karta hadii aysan jirin wax reebitaan ah oo khaas ah. Hal arrin oo laga reebay taa waa macluumaadka dhaqaalaha ee ganacsiga ee loogu soo gudbiyo hay'adaha dowliga ah ujeedooyin ah in ganacsiga la siiyo deeqda, macluumaadka caynkaa ahi waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay xog gaar ah ama macluumaad aan cid walbaa arki karin. Si kastaba na noqotee Degmadda Hennepin waa khasab inay u hogaansanto dhamaan shuruudaha Sharciga Ilaalinta Xogta ee la yiraa (Minnesota Data Practices Act).

21. Sidee ku ogaan karaa in aan magac fiican leeyahay? Waa maxay macnaha "magaca fiican"?

"magaca fiican" macnihiisu waa in ganacsigaagu uu shaqeyanayey uuna lahaa wixii diiwaangelinta ganacsiyada uu ka rabo Xafiiska Xoghayaha Gobolka (Office of the Secretary of State) Maarso 1, 2020 iyo in aan wax canshuurta Minnesota ah aan lagu lahayn oo laga xareeyey Xafiiska Xoghayaha Gobolka (Office of the Secretary of State).

(You can look up your registration). Fadlan diyaar ha kuu ahaado lambarka faylkaaga kolka aad buuxinayso codsiga deeqda.

Fadlan ogow, iyadoo hadba ku xiran nooca ganacsigaaga, waxaa dhici karta inaan lagaaga baahan inaad ka diiiwaan gashan tahay Xoghayaha Gobolka (Secretary of State). Hadii taasi ay jirto, waxaa

laguu arki inaad “magac fiican” ku leedahay Xafiiska Xoghayaha Gobolka (Office of the Secretary of State) Tusaale ahaan, hadii aad tahay mulkiile kaligii iska leh ganacsiga kuna hawlgala magacaaga, khasab ma aha inaad iska diiwaan geliso gobolka.